

# Waxka Ogow Qorshaha Buuxa ee 2035-ka

Qorshaha Buuxa ee Portland waa hab wax tilmaamaha oo loogu tala galay mustaqbalka bulshadeena iyadoo magaaladu ay balaaranayso sidoo kalena isbeddelayso. Gaar ahaan, tani waxay saamaynaysaa goobaha dhismayaasha cusub, jidadka, ganacsiyada iyo guryuhu ay u jihaysan yihiin 25 sano ee soo socda.

Qorshahan la hiigsanayaa wuxuu salka ku hayaa aragti ay hogaanka u hayso magaalo daacad ah oo aan liicin, oo ah meel dadka iyo degaankuba ay yihiin kuwo caafimaad leh iyadoo ganacsiguna yahay mid guulaysan kara. Magaalo qofkastaa uu heli karo fursaddo iyagoo taageero ka geysan kara go'aanada bulsho ee saamaynta ku yeelanaya, iyaga iyo qoysaskooda.

## Tani waxaa ka mid ah tilmaamo ka caawin kara magaalada iyo bulshadu si ay:


1. Abuuraan meel xaafaddo ku haboon oo dadku tegi karaan goobaha ay rabaan, kana heli karaan waxyaalaha iyo adeegyada ay u baahan yihiin.
2. Ugu fudaydso in shaqo si sahlan u helaan.
3. Hoos ugu dhigaan hawada wasakhaysan.
4. U kordhiyaan meelaha dabiiciga ah iyo beeraha nasashada.
5. U laaliyaan oo ay kor u qaadaan kaabayaasha bulshada, sida jidadka, wadooyin jidka hareertiisa ku yaala ee lagu socda iyo beeraha nasashada.
6. U diyaar garoobaan isbeddelka hawada, dhulgariirka iyo dhibaatooyinka kale ee dabiiciga ah.
7. U qorsheeyaan oo abuuraan jidad iyo goobo ku haboon xaaladdaha degaanka ka jira.



Bureau of Planning and Sustainability  
Innovation. Collaboration. Practical Solutions.

City of Portland, Oregon  
Charlie Hales, Mayor • Susan Anderson, Director





## Qorshaha la hiigsanayo waxaa ka mid ah, ujeedooyinka la leeyahay, siyaasadaha, khariidadaha iyo mashruucyada qaybta ka qaata go'aaminta:

- Tirada guryo iyo shaqo ee laga abuurin karo Portland.
- Halka iyo sida loo isticmaalo guryaha cusub, ganacsiga, beeraha nasashada iyo warshadaha.
- Halka ay tahay in Magaaladu ay dhiso ama kor u qaado jidadka, wadooyin jidka hareertiisa ku yaala ee lagu socdo, beeraha nasashada iyo hababka maaraynta biyaha roobka.
- Sida xubnaha bulshada ka tirsani uga qayb qaadan doonaan qorshayaasha isticmaalka dhulka ee mustaqbalka iyo go'aamada.
- Sida xafiisyada magaalada iyo gobolka iyo hay'adaha gobolku ay wada shaqeeyaan.


## Maxaa hada loo samaynayaa?

30 sano ayaa laga joogaa markii u horreysay ee Portland ay qortay Qorshaheedii Buuxay. Wixii intaa ka dambeeyay magaaladu waxay kortay inka badan 40 boqolkiiba. 25 sano ee soo socda, rubuc malyuun kale oo dad ah ayaa ku noolaan doonaa Portland.

Dad badan macnaheedu waa in ay jiraan dad kala duwan. Iyadoo ay tahay in qofkastaa uu heli karo shaqooyin, adeegyo, meelo ay bulshadu iskugu timaado oo ay nolol cusubi ka muuqato.

Waxaa sidoo kale loo baahan yahay in si wadajir ah loo wada shaqeeyo in loogu diyaar garoobo isbeddelka hawada iyo dhibaatooyinka kale ee dabiiciga ah.

Kororka Dadka ee Portland




## Sideen uga qayb qaataa?

Booqo website-ka:  
[www.portlandoregon.gov/bps/pdxcompplan](http://www.portlandoregon.gov/bps/pdxcompplan)

Email noogu soo dir:  
[pdxcompplan@portlandoregon.gov](mailto:pdxcompplan@portlandoregon.gov)

Naga soo wac:  
 503-823-7700 Language Line (Khadka Luqadda) waa la helayaa kaasi oo ah mid telefoon ahaan ah)



Xafiiska Qorshaynta iyo Joogtaynta waxaa ka go'an in ay bixiyaan macluumaad iyo habka maqalka oo loo wada siman yahay. Haddii aad u baahan tahay waxyaalo gaar ah, turjumaad ama farsraad faqlan wac 503-823-7700, TTY Magaalada 503-823-6868, ama Adeegyada Gudbinta Wararka ee Oregon 'Oregon Relay Service' 711.